Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Kooras ku saabsan bulshada Finland

## Sharciyada dalkan Finland



**Sharciga Finland qaybaha qaarkood waa uu ka duwan yahay sharciyada dalalka kale. Sababtaas awgeed ayay muhiim u tahay in aad barato sharciyada iyo xeerarka Finland, si aad u hesho macluumaad sax ah oo arrinkaas ku saabsan. Qaybtaan waxaan kaga hadli doonnaa arrimaha soo socoda:**

- **Xuquuqaha iyo waajibaadka**
- **Sharci dambiyeedyada Finland**
- **Xaggee ayaad caawimaad ka heleysaa, haddii aad noqoto dhibane dambi**

**Waxaa intaas dheer oo lagu siin doonaa tilmaanbixin la xiriirta sameynta imtixaanka elegtoroonigga ah.**

# Xuquuqda iyo waajibaadka dalkaan Finland

Fionland gudaheeda dhammaan dadka oo dhan waa ay siman yihiin. Dhammaan dadka degan Finland iyo kuwa ku nool ee shatciga degganaashaha dalka ku haysta, waxaa ay leeyihiin xuquuq, waxaana sidoo kale lagu leeyahay waajibaad.  Qof walbaa waxaa laga filayaa in uu si wanaagsan ula dhaqmo dadka kale.

Dadka ku nool Finland gudaheeda ee muwaadiniinta finishka ah iyo kuwa ajaanibta ahba, waxaa ay u siman yihiin xuquqda ah in si wanaagsan loola dhaqmo. Lama oggola takoorista iyo qashqashaadda loo gaysto dhammaan dadka oo dhan. Takoorista lama oggola, iyadoo aan loo eegeynin da'da qofka, asalkiisa, jinsiyaddiisa, luqaddiisa, diintiisa ama waxa uu aaminsan yahay, siyaasaddiisa, xirfaddiisa shaqo, xiriirka qoyska, naafannimada, xaalada caafimaad, fikirkiisa xagga jinsinnimada, ama sababo kale oo qofka ku saabsan.

Bulshadeenna waxaa saaran waajibaad, kuwaasoo dadka ku nool iyo kuwa sharciga degganaanshaha ah ku joogaba ay waajib ku tahay in ay raacaan.

Tusale ahaan Finland gudaheeda kuma samayn kartid arrimaha soo socoda:

- Dadka kale qiimahooda shakhsiahaaneed kuma dhaawici kartid hadal ama fal ahaan,
- Ilmaha iyo dadka waawaynba dhibaato kuma gaarsiin kartid qaab hadal ahaan ama fal ahaan ah, ma garaaci kartid, qaab dhibaatayn xagga jinsiga ahna ma gaarsiin katid,
- Qofna si xun ulama dhaqmi kartid ama
- Dadka kale hanjabaad ahaan cadaadis kuma saari kartid

## Xuquuq badbaado

Qof kasta oo Finland ku nool wuxuu xaq u leeyahay in si munaasib ah ama ku habboon arrinkiisa loogu falanqeeyo maxkamadaha iyo hay’adaha kale ee dowladda. Dadka saboolka ah ama hantida yar, waxaa ay xaq u leeyihiin ka caawinta arrimaha sharciga oo lacag la’aan ah.

Markasta shaqooyinka howlwadeennada dowladda waxaa laga qaadan karaa racfaan, ama waa laga caban karaa, haddii aad u aragto in si khalad ah laguula dhaqmay. Maxkamaduhu waxaa ay racfaanka ku sharraxaan qaab ku salaysan qodobo sharciyeed.

Howlaha ay qabtaan shaqaalaha xerada qaxootiga amaba adeegyada xerada qaxootiga waxaa cabashada ka dhanka ah loo gudbin karaa madaxa xerada qaxootiga ama laanta xeryaha qaxootiga ee Waaxda socdaalka: **migri@migri.fi**



## Dambiyada lagu galay Finland waxaa la waafajinayaa sharciga dambiyada Finland

Sharciga dambiyada ayaa qeexaya falalka lagu mutaysanaayo ciqaabta, qaabka ciqaabtu ay noqonayso iyo mudada ciqaabta. Xukunnada la rido waa ay kala duwan yihiin, tusaale ahaan waxaa ka mid ah ciqaab ganaaxeed, in qofka lagu waajibiyo shaqo ah u adeegga bulshada, xabsi shuruud ku xiran iyo xabsi qofka la gelinaayo. Waxaa ciqaabta ka sokow, lagu xukumi karaa qofka magdhowga khasaaraha uu geystay.

Inta ugu badan dambiyada waxaa ay hoostagaan oo gacanta ku haya xeerilaaliyaha rasmiga ah, taasoo loola jeedo in boolisku ay baari karaam, xeerilaaliyuhuna uu dambiga soo oogi karo, xitaa haddii dhibanaha dambigu uusan dalban ciqaabta arrinkaas. Tusaale ahaan dagaalka dhexmara xubnaha qoyska dhexdooda, qofka dagaalka gaystay dambiga waa lagu soo oogi karaa, xitaa haddii qofka dhibanaha ah ee dagaalka loo gaystay uusan arrinkaas doonaynin.

# Dambiga waa in aan la fiirsan!

Finland gudaheeda waa waajib qof walba saaran in uu booliska u sheego, haddii uu ogyahay in uu jiro qof qorshaynaaya dambi aad khatar u ah. Sidoo kale wax kaqabasho la'aanta ama dayaacadda arinkaas oo loola jeedo, iska dhaafidda wax kaqabashada arrin taagan ama ku dhiirigelinta iyo kicinta faldambiyeed, waxa dhici karta in ay dambi noqdaan.

Waajibka ah soo sheegista waxaa ay khuseysaa dambiyada khatarta ah ee waaweyn sida, dambi nafeed, kufsiga, jirdilka, dhaca ama falal samayntooda loola jeedo argagax gelin. Kicinta ama ku dhiirigelinta faldambiyeedka waxaa ay la xukun tahay sida qofka falka dambiga ah sameeyay oo kale.

Dambiyadu waxaa ay saameyn ku yeelan karaan arrinka la xiriira sharciga degganaanshaha dalka ama ciqaamadda. Waa loo diidi karaa ama waa lagala laaban karaa sharciga degganaanshaha dalka ama ciqaamadda, haddii qofka ajnabiga ah loo arko in uu yahay mid khatar gelinaaya ammaanka iyo nidaamka guud ee dalka.

# Dambiyada ay sameeyaan carruurta iyo dhallinyarada

Dalkaan Finland caruurta da'doodu ka yar tahay 15-ka sano, ma jirto wax mas'uuliyad xeer ciqaabeed ah oo dusha ka saaran, laakiin haddana waxaa laga doonayaa oo saaran mas'uuliyadda ah in ay soo gudaan ama magdhabaan khasaaraha ay geystaan. Tusaale ahaan garaacista ama wax ku dhufashada qof kale, xadista hanti qof kale ama jebinta daaqadda, waxaa dhici karta in fal sameeyaha lagu xukumo inuu soo gudo ama magdhabo khasaarahaas uu geystay.

Finland gudaheeda waxaa ka jira wadashaqeyn noocyo badan oo ka dhexeysa howlwadeennada dowladda, sidoo kale booliska xitaa qeyb ayay ka yihiin wadashaqayntaan. Boolsiku waxaa dambiyada ay gaystaan carruurta dad'doou ka yar tahay 18-ka sano ay u gudbiyaan howlwadeennada badbaadada carruurta. Sidaa ayuuna welwelka ka jira dhanka nololwanaagga ilmaha ama qofka dhallinyarada ah, uu ugu gudbayaa jihooyinka ku shaqada leh in ay ka caawiyaan arrimahaas, si ay qiimeyn arrinka ugu sameeyaan. Howlwadeennada badbaadada carruurtuna waxaa ay arrinka ka qiimeynayaan dhanka ku saabsan nololwanaagga ilmaha, iyagoo ka baarandegaya in qoyska ama ilmuhu uu baahan yahay caawimaad iyo badbaado ku saabsan xaaladdaas iyo inkale.



# Xoog-muquunin

Xoogmuquunintu waxaa ay noqon kartaa mid jir ahaaneed ama mid xagga jinsiga ah, ama in arrimahaas loogu hanjabo, iyo sidoo kale si xun ula dhaqmid:

- **Xoog-muquuninta jir ahaaneed** waxaa tusaale ahaan ka mid ah wax ku dhafasho ama garaacis, kalatuuris, ceejin, harraati ama laad la dhicis, gudniinka. Xoogmuquuninta jir ahaaneed waa wax kasta oo ah taabasho ama xanuunjin jir ahaaneed oo loo geysto qofka kale.
- **Xoog-muquuninta nafsad ahaaneed** waxaa tusaale ahaan ka mid ah hanjabaadda qof kale loo geysto, cayda, dadka kale oo qofka laga takooro, si xun ula dhaqmid, iyo in la baaro qofka kale telefoonkiisa iyo iimeylkiisa. Ma jirto wax astaan muuqata ah oo ka haraya xoogmuquuninta nafsad ahaaned, waana sababta ay mararka qaarkood u adag tahay in la aqoonsado.
- **Xoog-muquuninta jinsiga ah** waxaa tusaale ahaan ka mid ah faraxumeynta, taataabashada, qashqashaadda, kufsashada, galmood ku khasabka, ama faraxumaynta xagga jinsiga ah. Xoogmuquuninta jnisiga waxaa ah dhammaan falalka jinsinnimo, kuwaaso la sameeyo iyadoo uusan qofku doonaynin ama rabitaankiisa ka soo horjeeda. Xoogmuquuninta jinsiga ah waxaa dhici karta in qaab ahaan uu noqodo mid jir ahaaneed ama mid nafsad ahaaneed.
- **Si xun ula dhaqmid** waxaa tusaale ahaan ka mid ah dayacaadda baahiyaha asaasiga ah ee ilmaha (daryeel aan dhammaystirneyn). Si xun ula dhaqmiddu waa xoogmuquunin loo geysto qof laga mas'uul yahay oo aan waxba iska dhicin karin, sida ilmo yar ama qof waayeel ah.



# Xoog-muquuninta qoyska iyo ehelka dhow ka dhex dhacda

Xoog-muquuninta qoyska iyo ehelka dhow waxaa loola jeedaa, falalka uu qof ka tirsan xubnaha qoyska ama qof kale oo ehelka dhow ah u gaysto qof kale oo xubnaha qoyska ka mid ah (nafsad ahaan  jir ahaan, jnisi ahaan, dhaqaale ahaan ama in kuwaas oo dhan loogu hanjabo). Sidoo kale xoog-muquuninta ku dhacda guurka dhexdiisa, sida tusaale ahaan kufsiga waa fal ciqaab lagu mutaysanaayo. Xoogmuquuninta ka dhex dhacda qoyska dhexdiisa, waxaa qofka falka xoogmuquuninta ah sameeyay lagu soo oogi karaa dambi, xitaa haddii falka xoogmuquuninta ah uu ka dhacay meel gaar ah ama qofka dhibanaha ah uusan arrinkaas doonayn.

# Ceejinta

Carruurtu waxaa ay xaq u leeyihiin in ay helaan badbaado gaar ah, dhammaan xoogmuquuninta ilmaha loo geysto lama oggola. Sida sharcigu dhigaayo waa in ilmaha laga ilaaliyaa dhammaan xoogmuquuninta la xiriirta dhanka nafsadda iyo midda jir ahaaneedba, sidoo kale waa in laga dhowraa si xun ula dhaqmista iyo faraxumaynta.
Tusaale ahaan ilmaha oo lagu ciqaabo in timaha laga rifo, ama la garaaco ama cunugga yar oo la gilgilo, intuba waa falal ciqaab lagu mutaysanaayo.

Sida uu sharcigu dhigaayo ilmaha lama liidi karo, ciqaab jir ahaaneed looma geysan karo, loolamana dhaqmi karo qaab xadgudub ama dhaawac ku ah ilmaha. Finland gudahaeeda xoogmuquuninta ma ahan qaab tarbiyadeed la oggol yahay.



# Xoogmuquuninta xagga sharfta la xiriirta

Xoogmuquuninta dhanka sharafta la xiriirta waxaa loola jeedaa, xoogmuquunin ama xadayn la xiriirta difaac sharafeed, taasoo ka dhacda qoyska ama ehelka dhexdiisa. Xoogmuquunin sharafeedku waxaa ay qaab ahaan noqon kartaa mid nafsad ahaaneed iyo mid jir ahaaneedba, waxaana ay noqon kartaa mid ka kooban astaamo ahaan xoogmuquunin qoyska iyo ehelka dhow  ka dhex dhacda.

Haddii xubinka qoyska lagu tuhmo in uu jabiyay anshaxii ama dhowrsanaantii bulshada, waxaa arrinkaas tusaale ahaan ka dhalan kara, in qofkaas la saaro cadaadis, xadayn dhanka dhaqdhaqaaqa ah iyo koontarool , guriga in lagu go'doomiyo, guur in lagu khasbo, in loo hanjabo ama xoogmuquunin lagu sameeyo. Ujeedada laga leeyahay xoogmuquunin sharafeedka, waa in dib loo so celiyo sharafti iyo sumacaddii bulshada, qoyska ama ehelka, iyadoo ciqaab arrinkaas looga dhigaayo qofkii jebiyay xeerarkii ama sharciyadii sharafta. Sababaha keena xoogmuquunin sharafeedka waxaa ay noqon karaan tusaale ahaan, didmada guurka, furriin, qaab labiseed loo fasirtay in uu yahay mid a aan anshax ahayn, ama la socoshada ama shukaansiga qof aan reerku oggolayn. Sababta xoogmuquuninta waxaa dhici karta in ay noqoto oo kaliya tuhun ah in arrinku yahay habdhaqan aan sharaf ahayn. Qofka sameeyay falka xoogmuquuninta iyo kan ku dhiirigeliyay dambigaasba, dhanka xeerka ciqaab ahaaneed waa ka mas'uul ah falka ay gaysteen.

# Faldambiyeedyada galmoodka

Finland gudaheeda waxaa dhammaan dadka ku nool, ay leyihiin xornimo ama xuquuq ismaamul oo dhanka jinsinimada ah. Waxaa arrnkaas loola jeedaa in qof walbaa uu xaq u leeyahay arrimaha jirkiisa u gaarka ah iyo inaan la taaban karin.  Xoogmuquuninta jinsinimada waxaa ay noqon karaan falal kasta oo jinsiyeed, oo lagu sameeyo qofka isagoo aan doonaynin ama rabitaankiisa ka soo horjeedda. Falka galmo ee ikhtiyaariga ah waa in lagu muujiyaa qaab ah hadal, habdhaqan ama qaab kale. Qof walba oo Finland ku nool isaga ayaa xaq u leh inuu go'aan ka gaaro arrimihiisa u gaarka ah ee xagga jinsinimada iyo jirkiisaba, sidoo kale wixii ku saabsan guurka iyo cidda uu la soconaayo ama shukaansanaayo.

Sharciyada Finland ee degsan ayaa lagu qeexay, nooca dambi ee falalka dhaawici karaaya xornimada ama xuquuqda ismaamulka xagga jinsinimada  iyo sharciyada Finland ee  laga dejiyay falalka ciqaabta lagu mutaysanaayo. Waxaana kuwaas ay kala yihiin:

- kufsiga
- burburka xagga jinsiga
- u isticmaalid xagga galmoodka ah
- faraxumayn jinsiyeed
- sawirka jinsiga ah oo la faafiyo iyadoo aan wax fasax ah loo haysan
- isticmaalka qofka ku jira ganacsiga xagga jinsiga ah
- In loo galmoodo ama galmoodka laga iibsado ilmo ka yar 18 sano jir

- gawaadid (paritus)
- kufsashada carruurta
- burburka jinsiyadeed ee carruurta
- faraxumaynta jinsiyeed ee carruurta loo geysto
- In ilmaha lagu qalqaaliyo ama lagu soo jiito fal galmood ah
- haysashada sawirka mujinaya cawrada ilmaha ama faafintiisa
- cawrada ilmaha oo la daawado ama dabaggal lagu sameeyo

faa'iidaysanaayo darajada ama heerka u gaarka ah ee qofka, ka maarmid la'aanta ilmaha ama qofka dhallinyarada ah, ama inuusan lahayn awood uu iskaga difaaco. Falku wuxuu noqon karaa noocyada kale ee jinsiga ee aan ahayn xubinka taranka oo kan kale la geliyo. Tusaale ahaan faraxumeynta jinsiga waxaa ka mid ah dhibaateynta faraxumeynta, taataabashada, ka codsiga dhar iska saarista, sawir ka qaadista, sidoo kale qalqaalinta ama ku soo jiidashada dhanka internetka iyo baraha bulshada ayaa ah falal ay ka dhalanayaan xukun maxkamadeed

## Faldambiyeedyada galmoodka ee carruurta ku wajahan

Xadka da'da ee Finland u degsan in galmood lala sameeyo qof kale waa da'da 16 sano.  Qof weyn ama qof kale oo dhallinyaro ah oo dad'diisu si cad uga weyn tahay 16 sano, wax galmood ah lama samyn karaan qof da'diisu ka yar tahay 16 sano. Falkaas waa mid ciqaab lagu mutaysanaayo, xitaa haddii ilmaha galmoodka lala sameeyay uu arrinkaas oggol yahay. Mas'uuliyaddu waxaa ay saaran tahay qofka weyn.

Isticmaalka jinsiga waxaa loola jeedaa in **ilmaha/qofka dhallinyarada ah** lagu qalqaaliyo ama lagu khasbo falkaan galmoodka ama xagga jinsiga ah, iyadoo laga



# Gudniinka gabdhaha (FGM)

Gudniinka gabdhaha waa qaab xoog-muquunin ah oo loo geysto gabdhaha iyo haweenka. Waxaana sida guud loo isticmaalaa ereybixinta ah FGM (jarjarista xubinka taranka ee haweenka, amaba waxaa la oran karaa gudniinka fircooniga ah).

Gudniinka gabadhaha iyo haweenka waxaa loola jeedaa dhammaan wixii howl noocaas ah oo ku salaysan sabab dhaqan ahaan ah, ama mid aan ahayn daryeel caafimaad, kaasoo la gaarsiiyo qaybta kore ee xubinka taranka haweenka ama la jarjaro ama qaab kale dhibaato loogu geysto.

Dhammaan qaababka kala dwuan ee gudniinka gabdhaha waa arrin dambi ka ah Finland gudaheeda, waxaana qofkii dambigaas lagu helo lagu xukumi karaa 10 sano oo xukun xabsiyeed ah. Sidoo kale ku dhiirigelinta gudniinka ama qorsheyntiisa wa dambi. Marka la samaynaayo qorsheynta ku saabsan gudniinka gabdhaha, macnuhu waxaa weeye qorsheyn ku saabsan jirdil culus oo ilmaha loo gaysanaayo, taasoo ku waajibinaysa howlwadeennada dowladda in ay falalka noocaas oo kale ah ku wargeliyaan booliska iyo badbaadada carruurta.



## Ka ganacasiga dadka

Ka ganacsiga dadka waxaa loola jeedaa in qof kale lagu sameeyo koontarool ama khalad u isticmaalid iyo ka faa'iidaysasho. Waxaana arrinkaan uu ku dhici karaa iyadoo qofka lagu sameeyo marin habaabin ama in la khalddo, in la cadaadiyo ama si khalad ah loo isticmaalo ama looga faa'iidaysto in uu yahay qof cid kale ku tiirsan ama ku jira xaalad ammaan la'aan ah. Ka ganacsiga dadka waa dambi, kaasoo dhaawac ku ah qiimaha qofka ee gaarka ah iyo taabasho la'aantiisa. Dalkaan Finland gudihiisa ka ganacsiga dadka waa faldambiyeed lagu qeexay sharciyada dambiga.

Ka ganacsiga dadka ama ka faa'iidaysahsda ama khalad u isticmaalka la midka ah waxaa ay noqo karaan.

- U isticmaalis dhanka shaqada ah
- Ku cadaadin ka gacsiga jirka ama dhillaysi
- In qofka lagu khasbo fal dambiyeed ama dawrasi
- Guurka oo lagu kahsbo ama lagu cadaadiyo
- Ka ganacsiga xubnaha jirka ee qofka

Qaabaka koontaroolka loogu sameeyo dhibanaha ka ganacsiga dadka waxaa ka mid ah

- Xoog-muquunin jnisinimo, mid jirahaaneed iyo mid nafsad ahaaneed
- Bulshada oo laga go'doomiyo
- Dadka ehelka ah oo qofka u hajaba ama khiyaano ku sameeya
- Qofka oo qaamooba ama deyn lagu yeesho
- Hanjabaad ku saabsan sharciga degganaashaha dalka ama ciqaamadda

## Xaggee baad caawimaad ka heli kartaa xaaladaha degdegga ah

Xaaladaha degdegga ah waa in aad si dhakhso ah wax u qabataa. Xaaladda degdegga ah waa mid u baahan in si dhakhso ah wax looga qabto, marka qof dadka ka mid ah ay naftiisa, caafimaadkiisa, hantidiisa khatar ku jirto amaba degaanka ay khatar ka jirto.

**Waxaad markaa wacdaa lambarka arrimaha degdegga ama emerjensiga ee 112**

- **Lamabraka degdegga ah waxaa lagaa siin doonaa tilmaanbixin ku saabsan sida ugu saxsan ee xaaladdaas taagan aad wa uga qaban karto.**
- **Haddii aad turjubaan u baahan tahay, waxaa dhici karta in aad wax xoogaa sugto.**
- **Telefoonka ha damin, illaa iyo inta lagaa siinaayo amarka arrinkaas ku saabsan.**
- **Telefoonku waa lacag la'aan.**

# Wargelin dambi

Haddii aad noqoto dhibane dambi loo gaystay, waxaad wargelinta dambigaas u gudbin kartaa booliska. Booliska waxaa saaran waajibka ah in ay kaa qabtaan wargelintaas dambiga. Haddii aad u baahatana shaqaalaha xerada qaxootiga ayaa kaa caawin kara sidii aad booliska ula xiriiri lahayd.

Tilmaanbixinaha ama hagista ugu muhiimsan marka la samaynaayo wargelinta dambiga:

- Wargelinta waxaad sida ugu dhakhsaha badan ugu gudbisaa xarunta booliska, islamarka falku dhaco kaddib. Markaa booliska waa ay u fududdahay in ay caddeyn ku sameeyaan dambiga.
- Hadduu dhaawac ku soo gaaray ama lagugu sameeyay xoog-muquunin dhanka jinsiga ah, waxaa sida ugu dhakhsaha badan dhacdadaas kaddib u aaddaa dhakhtarka.
- Waxaad xaq u leedahay in aad hesho turjubaan, si aad u sameyso wargelinta dambiga.

## Arrinka ha isku keli yeelin, raadso caawimaad!

Way adag tahay in aad kaligaa wax ka qabato caddeynta ku saabsan ahaanshaha dhibanha dambiga. U imoow shaqaalaha xerada qaxootiga si aad ugala hadasho, haddii aad la kulanto go'doomin, qashqashaad ama aad noqoto dhibane dambi.
Xerada qaxootiga waxaad ka heleysaa caawimaad wadahadal ah, haddii loo baahdana waxaa lagu siinayaa hagista ku saabsaan caawimaadda intaa ka sii dheer.

Xoog-muquunintu waa dhibaato soo gaarta dhammaanba dhinacyada arrinku khuseeyo, xitaa qofka gaystay xoog-muquuninta wuxuu u baahan yahay caawimaad! Joojinta habdhaqanka xoog-muquuninta ah waa mid suurtaggal ah. Fal sameeyuhu waa in uu qaadaa mas'uuliyadda falkiisa iyo habadhaqankisaba, waayo arrinkaas ma ahan mid saaran qofka loo gaystay xoog-muquuninta. Xerada qaxootiga waxaad ka heleysaa caawimaad wadahadal, taageero iyo hagisba.

Waxaad xusuusnaataa, in shaqaalaha xerada qaxootiga ay saaran tahay

- Waajibka ah qarinta sirta dadka: shaqaaluhu kalama hadli karaan shaqaalaha kale ama howlwadeennada kale ee dowladda, arrimaha iyaga loo sheegay
- Waajibka ah wargelinta: shaqaalaha waxaa ku waajib ah in ay ku wargeliyaan howlwadeennada badbaadada carruurta, dambiyada iyo xaaladaha ku saabsan rabshadaha iyo xoog-muquuninta ka dhex dhacda qoyska.

# Annaga ayaa ku caawineyna!

Finland gudaheeda waxaa ka jira hay'ado iyo ururro badan oo kala duwan, kuwaasoo aad ka heli karto taageero iyo caawimaad.

Shaqaalaha xerada qaxootiga ayaad ke heleysaa warbixinta dheeraadka ah ee arinkaas ku saabsan:

- Apua rikoksen uhrille (caawinta dhibanaha dambiga): waxaad wacdaa telefoonka bilaashka ama lacag la'aanta ah 116006 ama gal bogga internetka ee cinwaankiisu yahay **www.riku.fi**
- Caawimaadda haweeneyda ajnabiga ah ee xoog-muquuninta lagu sameeyay: waxaad wacdaa telefoonka bilaashka ama lacag la'aanta ah 080005058 ama gal bogga internetka ee cinwaankiisu yahay **www.monikanaiset.fi**
- Lambarka caawimaadda haweenka lagu sameeyay xoog-muquuninta: waxaad wacdaa telefoonka bilaashka ama lacag la'aanta ah 080005005 ama gal bogga internetka ee cinwaankiisu yahay **www.nollalinja.fi**
- Ururka taageerada dadka laga tirobadan yahay ee dhanka jinsiga : **www.seta.fi**
- Xarunta caawimaadda ajnabiga naafada ah: **www.tukikeskushilma.fi**
- Telefoonka carruurta iyo dhallinyarada –Ineternetka dhallinyarada: waxaad wacdaa telefoonka bilaashka ama lacag la'aanta ah 116111 ama gal bogga internetka ee cinwaankiisu yahay **www.nuortennetti.fi**
- Warbixin ku saabsan badbaadada carruurta oo luqado kala duwa ku qoran: **www.lastensuojelu.info**
- Guryaha ammaanka: inta badan magaalooyinku waxaa ay leeyihiin guryaha ammaanka, kuwaasoo kali ahaan la aadi karo ama iyadoo carruurtu kula socdaan, haddii guriga ay ka jirto hanjabaad ama xoog-muquunin.
- Ururka Miessakit ry: adeegyo loogu talaggalay xaaladaha degdegga ah oo noocyo kala duwan ah **www.miessakit.fi/toimintamuodot/**

# Macluumaad dheeraad ah:

Guriga Finland -waa mashruuc fiidiyoow ah oo ka hadlaaya bulshada Finland. Mid ka mid ah mowduuca fiidiyoowyadaas ay ka hadlayaan waa xoog-muquuninta la xiriirta dhanka sharafta

Fiidiyowyaasha ka hadlaaya mowduucyadaas waxaa ka heleysaa Youtube-ka:

**https://www.youtube.com/c/KotonaSuomessa/playlists**

Fiidiyoowyada waxaa lagu daawan karaa luqadaha soo socda: finnsih, iswidish, ingiriis, carabi, dari, kurmandzi, somali, sorani, tthaylaandi, shiinaha, faransiiska, istooniya, tigrinya iyo ruush.

Mashruuca ammaanka waxaa laga diyaariyay fiidiyoow, kaasoo mowduuca uu ka hadlayaa yahay xuquuqaha asaasiga ah ee qofka ee dalkaan finland gudihiisa iyo dambiyada kala duwan.

Fiidiyowyaasha ka hadlaaya mowduucyadaas waxaa ka heleysaa kanaalka Youtube-ka waaxda socdaalka :

**https://www.youtube.com/user/Maahanmuuttovirasto/playlists?view=50&sort=dd&shelf_id=6**

Fiidiyoowyada waxaa lagu daawan karaa luqadaha soo socda: finnsih, carabi, dari, ingiriis, Isbeyn, kurdi-sorani, pershi, faransiis, somali, turkki iyo ruush.

Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service